

# SAMORDNAD INDIVIDUELL PLAN.

## QORSHE QOF AHAANEED.

Hadii ilmahaaga/dhalinta ama adiga naf ahaantaada amase haddii aad ka mid tahay dhalinyarada waaweyn ee aad kaalmo ka hesho hay'ado kala duwan, waxaa laga yaabaa inaad ku fekerto iney haboon tahay in kaalmadaas la isla maareeyo. Waxaa ay noqon karaan hay'ad kala duwan sida iskuulka, xanaanada, arrimaha bulshada iyo rugta caafimaadka. Waxaa kolkaas lagaa caawin karaa in la isugu yimaado shir, kaasoo lagu samaynaayo qorshe qof ahaaneed oo lagu magacaabo SIP (samordnad individuell plan).



### KULANKA - SIP

Shir ayaa adiga iyo dadka kale ee leh qorshe la mid ah yoolka aad higsaneyso ay ku go'aansaneysaan qof walba waxii uu qaban lahaa, waxaana lagu qorayaa diiwaan lagu magacaabo qorshee shakhsiyeed. Wakhti ka dib ayaad hadana mar kale is arki doontaan si aad uga hadashaan sidii xaal noqday ama haddii loo baahan yahay in qorshaha isbedel lagu sameeyo.

Si loo suurto geliyo kulanka – SIP, waa in la helaa ogolaanshahaaga/ka raali ahaanshahaaga in la wada shiro. Adiga ayaa shirka qayb ka ah, wax ka qorsheynaaya, go'aana ka gaaraaya cidii lagu casumi lahaa.

Shirka ka dib waxaa aad heleysaa/ama aad heleysaan qorshihii lagu heshiiyey oo qoraal ah.



### MA DOONEYSAA IN LAGAA CAAWINO ABABULKA KULANKA - SIP?

Haddii aad dooneysid in lagaa kaalmeeyo qabashada kulanka – SIP, la hadal qof aad xiriir la leedahay ee jooga iskuulka, xanaanada, hay'ada arrimaha bulshada iyo goobaha caafimaadka.

